**SHARCIGA WAXBARASHADA JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOMALIA**

**SHARCIGA WAXBARASHADA HEERKA 1AAD, HEERKA 2AAD IYO TACLIINTA SARE**

**JUL 30, 2017**

**www.moesomalia.net**

## QEYBTA KOOWAAD

## SHARCIGA WAXBARASHADA GUUD

## (HEERKA 1AAD IYO HEERKA 2AAD)

**SHARCIGANI WAXAA LAGU DHISAY "SHARCI LAMBAR 6, TAARIIKH 12 FEB. 1987, SHARCIGA WAXBARASHADA GUUD EE JAMHUURIYADDA DIMOQARAADIGA SOOMAALIYA".**

# HORDHAC

Waxbarashadu waa xaq asaasi ah oo uu aadanuhu leeyahay, waxayna daruuri u tahay dhinacyada kala duwan ee kordhiya horumarka sida, la dagaallanka faqriga, kobcinta dhaqaalaha, dowlad wanaagga iyo dimoqraadiyadda.

Dib u habaynta hannaanka sharciga waxbarashada dalku waxay qayb ka tahay hawlaha muhiimka ah ee laga doonayo in ay dawladdu ku hagto dalka tubta dib u dhiska iyo horumarka, sare u qaadidda tayada waxbarashada heerarkeeda kala duwan iyo guud ahaan la-dagaallanka jahliga. Haddaba  waxaa lagama maarmaan ah in Waxbarashadu ay yeelato siyaasad cad iyo sharci lagu nidaamiyo habsami u socodka waxbarashada dalka iyo maamulkeeda.

Hiigsiga fog ee laga leeyahay waxbarashada dalka waa sidii lagu gaari lahaa "Nidaam waxbarasho oo horseeda wadajir ummadeed, wadaniyad, cadaalad, nabad iyo horumar waara".

Si loo xaqiijiyo hiigsiga fog ee waxbarashada waxaa muhiim ah inay jirtaa himilo sax ah, taasina waa in la helaa "Wasaarad awood leh oo shaqeyneyso, lehna maamul wanaagsan iyo shuruuc hagaysa, Manhaj mideysan iyo adeeg waxbarasho oo hufan oo la heli karo loona siman yahay".

Waxbarashadu waxay u baahantahay qorshe iyo istaraatiijiyad toosan oo ku saabsan sidii loo horumarin lahaa. Sidaas daraadeed, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Jamhuuriyadda Feederaalkaa Soomaaliya markay aragtay qodobbada 30aad iyo 31aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxay soo saarayaa Sharcigan oo noqon doono midkii xeerin lahaa habka waxbarashada dalka Soomaaliya, kaasoo dammaanad qaadayaa xaqa  uu leeyahay qof kasta oo Soomaali ah si uu u helo waxbarasho tayo leh oo heerar kala duwan leh, waxaa kaloo uu faah faahinayaa bar tilmaameedka waxbarashada heer qaran, mid gobal iyo tan dagmooyinkaba iyo waliba habka loo gudbinayo adeegga waxbarashada iyo natiijada laga filaayo in ay ka soo baxdo.

Waxaan rajaynayaa inuu sharcigan gacan ka geysan doono sidii dib loogu soo celin lahaa hantidii Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare oo waqtigan xaadirka ah loo isticmaalo dano gaar ah, waxaa kaloo uu sharcigani wax ka tari doonaa tayada waxbarashada dugsiyada iyo Jaamacadaha.

**Wabillaahi Towfiiq**

# CUTUBKA 1AAD: QODOBADA GUUD

## Qodobka 1aad: Fasiraadda Ereyada

Marka sharcigan laga hadlayo, erayada hoos ku qoran mid waliba waxaa uu leeyahay micnaha ku hor qoran:

1. "**Jinsiga**" Waxaa loola jeeda  rag iyo haween labadaba
2. ***"Dugsi*"** Waa goob loo diyaariyay in wax lagu barto kuna habbooon in lagu fuliyo, dugsi wuxuu noqon karaa mid dowladeed ama mid gaar loo leeyahay, waxaa kaluu noqon karaa hal fasal ama fasallo badan oo ay ku jiraan xarumaha guur-guura/Wareega, dugsiyada quraanka iyo xarumaha waxbarshada aqoon dirsiga.
3. **"Heer waxbarasho"** Waxaa loola jeedaa muddo waxbarasho oo sannado xaddidan leh.
4. ***"Dalka*"** Waa dhulka ay leedahay Jumhuuriyadda Federaalka  ee Soomaaliya
5. ***"Dugsiyada sare ee farsamaa"*** Waa xarumo *waxbarasho farsamo oo heer dugsi sare ah* muddada wax lagu bartaana ay noqon karto saddex ilaa afar sano.
6. ***"Dugsiyada sare ee xirfadaha (skills)"*** Waa xarumo waxbarasho xirfadeed oo heer dugsi sare ah, muddada wax lagu bartaa ay noqon karto laba ilaa saddex sano.
7. ***Sharciga Waxbarashada*:** Waa nidaam soo koobaya, isla markaana qeexaya hawlaha Waxbarashada la xiriira, kana ilaalinaaya in ay iska horyimaadaan ama ay ka baxaan jidka loo jeexay oo ku dhisan shuruucda iyo xeerarka dalka.
8. ***"Maamule"*** Waa qof loo xilsaaray in uu dugsi maamulo ama ku simo maamulaha
9. ***"Macallin"*** Waa bare ama barbaariye si sharciyeysan wax uga dhiga xarumaha waxbarashada.
10. ***"Manhajka Qaranka"*** Waa nidaam iyo siyaasad oo loo dajiyay Waxbarashada dalka
11. ***"Mu'asasad Waxbarasho*"** Waa hay'ad Waxbarasho oo aanay Dowladdu lahayn
12. ***"Waalid"*** Waa Hooyada iyo Aabbaha ardayga dhalay ama midkood, ama qof kasta oo soo koriyey ama sifo kale oo sharci ah uga mas'uul ah ardayga.
13. ***"Wasaaradda*"**  Waa Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare
14. ***"Wasiirka*"** Waa wasiirka Wasaarada Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare
15. "**Waxbarashada Hoose-Dhexe**"  Waa waxbarashada heerka koowaad oo ka bilaabanta fasalka koowaad ilaa fasalka siddeedaad looguna talagay kobcinta aqoonta ardayda da'doodu u dhexeyso 6 jir illaa 15 jir
16. "***Waxbarashada Guud***" Waa waxbarashada Hoose-Dhexe iyo dudsiga sare oo ka kooban waxbarashada heerka koowaad iyo heerka labaad 1-12aad
17. ***"Waxbarashada tooska ah*"** Waa waxbarasho  xiriirsan  ah oo ku dhisan nidaamka heerarka Waxbarashada sida heerka koowaad, labaad iyo saddexaad
18. ***"Waxbarashada dadban"*** Waa waxbarasho nidaamsan oo ka duwan Waxbarashada tooska ah

19. ***"Waxbarashada baahida gaarka ah"*** Waa Waxbarasho loogu tala galay ardayda ay ku adagtahay waxbarashada ama ka heer sarreeya facooda, waxaana ka mid ah dadka naafada ah jir ahaan ama maskax ahaan ama labadaba/ama ay hibadiisu aad u sarayso
20. ***"Waxbarashada Gaarka loo leeyahay"*** Waa Waxbarasho nidaamsan, manhaj ahaan iyo maamul ahaanba oo ay bixiyaan mu'asasado ama dallado Waxbarasho oo aanay Dowladdu lahayn oo si sharci ah uga diiwaan gashan Wasaaradda
21. **"Dallad waxbarasho"** Waa mu'asasado waxbarasho oo isu tegay oo aanay dowladdu lahayn
22. ***"Imtixaanka shahaadiga ah"*** Waa imtixaanka ugu dambaya ee loogu gudbo heerka labaad ama heerka saddexaad

## QODOBKA 2AAD: MABAADI'DA GUUD EE WAXBARASHADAA QARANKA

Si loo habeeyo nidaamka, iyo qaab-dhismeedka waxbarashada, waa in la dhowro mabaadi'da soo socota:

- Dhaqan-gelinta siyaasad waxbarasho, manhaj iyo qaab gudbineed oo midaysan.
- U daadejinta awoodaha maamul ee waxbarashada  goobaha adeegyada waxbarasho iyo maamulka dowladaha gobollada, iyada oo si cad loogu kala qeexayo waajibaadka iyo mas'uuliyadaha;
- Dejinta hal-beeg waxbarasho iyo dhaqan gelinta qaab lagu xaqiijinayo tayada heerarka waxabarasho iyo qaybeheedaba;
- Helidda adeeg waxbarasho oo loo simanyahay si loo helo dad leh tayo iyo wax soo saar oo isku dheelli tiran
- Siinta tababarro joogto ah ee shaqaalaha iyo macallimiinta waxbarashada si kor loogu qaado heerkooda aqooneed iyo kan xirfadeed.
- Hanashada iyo gacan-kuhaynta  hanti kasta oo ma guurto ah oo wasaaraddu leedahay;
- Dhisida iskaashi lala yeesho qoysaska, bulshada, maamulka dowladdaha hoose, ganacsatada, ururada xirfadlayaasha ee kala duwan, xarumaha diinta iyo ururada bulshada.
- Taabbo galinta xaqa muwaadin kasta  u leeyahay in uu helo waxbarasho lacag la'aan ah ilaa iyo dugsiga sare sida ku xusan qodobka 30aad ee Dastuurka KMG ee JFS
- In la hirgaliyo aragtiyada iyo howlaha nabadgalyada ee bulshada dhexdeeda

### Qodobka 3aad: Xuquuqda Waxbarashada

Wasaaradu waxay hirgalinaysaa istaraategiyadda waxbarashada lacag la'aanta ah si loo helo waxbarasho loo dhan yahay loona siman yahay.

### Qodobka 4aad: Ujeeddooyinka Guud ee Waxbarashada

Waxbarashadu waa laf-dhabarka awoodeed ee qaranku uu ku gaari karo horumar dhaqaale mid siyaasadeed iyo bulsheed oo waara. Haddaba, iyadoo garwaaqsan dowladu muhiimadda asaasiga ah, waxay tiirrar uga dhigeysaa Waxbarashada dalka ujeeddooyinka soo socda:

1. In la kobciyo fahamka, aragtida ku salaysan Diinta Islaamka, xoojinta xiriirka dunida Muslimka iyo caalamka intiisa kale.
2. In la cirib-tiro wax qorid-akhris la'aanta lana dhiirri geliyo waxbarashada dadka waaweyn.
3. In la dhiso bulsho ku saleysan qiimaha dhaqanka suuban iyo waddaniyadda, ilaalinta sharciga, sinnaan bulsho iyo midnimada qaranka Soomaaliyeed.
4. In la dhiirrigeliyo u sinnaanta fursadaha oo dhan, iyadoo la ogaanayo lagana hor leexinayo caqabadaha ka hor-imaan kara horumarka qofka iyo bulshada guud ahaanba.

5. In la soo saaro aqoonta, farsamada iyo hab-dhaqanka loo baahan yahay si dib loogu dhiso dalka, adduunkana loola jaan-qaado.
6. In la ilaaliyo oo la horumariyo deegaanka dabiiciga ah si isaga oo bed qaba loo dhaxalsiiyo jiilalka mustaqbalka.
7. In bulshada lagu dhiirrigeliyo dareen waddaninimo iyo nabadda oo xil gaar ah la iska saaro iyo wanaajinta xiriirka dadka, haddii ay noqoto bulshada, ummadda iyo caalamkaba.

**Qodobka 5aad: Awoodaha Wasaaradda**

Xilalka iyo Waajibaadka Wasaaradda Waxaa ka mid ah:

1. Dejinta, horumarinta adeegga iyo dhaqangalinta Siyaasadda Waxbarashada.
2. Dejinta, dhaqangalinta iyo horumarinta Manaahijta Waxbarashada.
3. Dhiirigalinta iyo kor u qaadidda waxbarashada dadka waawayn.
4. Dejinta iyo meelmarinta imtixaannada heerarka shahaado bixinta.
5. Hirgalinta Waxbrashada Baahida Gaarka ah ee ardayda taageerada u baahan
6. Dejinta Shuruucda Waxbarashada Dugsiyada Dawladda iyo kuwa gaarka ah
7. Xoojinta Xiriirka iyo la xisaabtanka Hay'adaha Waxbarashada.
8. Xoojinta xiriirka waxbarashada dowladda iyo tan gaarka loo leeyahay
9. Horumarinta Waxbrashada reer miyiga
10. Horumarinta wax Qorista, Akhriska iyo xisaabta
11. Kor u qaadidda tirada iyo tayada waxbarasho ay u siman yihiin gabdhaha iyo wiilasha
12. Dhiirrigalinta iyo horumarinta hiddaha, dhaqanka, fanka iyo suugaanta suubban ee Soomaaliyeed

## CUTUBKA 2AAD: NIDAAMKA WAXBARASHADA

**Qodobka 6aad: Waxbarashada**

Waxbarashada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa ay ka kooban tahay mid dowladeed iyo mid gaar ah

**Qodobka 7aad: Qeybaha Waxbarashada**

Qeybaha Waxbarashada dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waa:-

1. Waxbarashada tooska ah
2. Waxbarashada dadban

**Qodobka 8aad: Heerarka Waxbarashada tooska ah**

Heerarka Waxbarashada tooska ahi waxaa ay u kala baxaan sidan:-

1. Dugsiyada Qur'aanka iyo Xannaanada Carruurta
2. Heerka koobaad: Waxbarashada Hoose-Dhexe (fasalka 1aad ilaa fasalka 8aad)
3. Heerka labaad: Dugsiyada Sare
4. Heerka Sadexaad: Tacliinta Sare

**Qodobka 9aad: Dugsiyada Qur'aanka**

Ujeeddooyinka Dugsiga Qur'aanka waa in carruurta:

1. La baro Qur'aanka Karimka ah, laguna ababiyo jacaylka Diinta Islaamla
2. La baro higgaadda Luqadda Carabga
3. Lagu barbaariyo anshaxa iyo asluubta wanaagsan
4. Lagu barbaariyo jaceylka waalidka, macallimiinta iyo dariska
5. Lagu barbaariyo la dhaqanka faciisa

**Qodobka 10aad xannaanada carruurta**

Ujeeddooyinka laga leeyahay Dugsiyada Xannaanada Carruurta waxaa ay yihiin in ilmaha 3-6 sano jirka ah:-

1. La baro aasaaska Islamka laguna barbaariyo jacaylka diinta Islaamka
2. Lagu barbaariyo anshaxa wanaagsan sida maamuuska, naxariista, saaxiibtinimada, nabadgalyada iyo daryeelka hantida
3. Laga dhisaa xagga jirka, maskaxda iyo shucoortoodaba
4. Lagu dhiirrigeliyo hal abuurka, la dhaqanka faciisa iyo jacaylka dadkiisa iyo dalkiisa
5. La baro akhriska iyo qoritaanka xarfaha iyo tirada

**Qodobka 11aad: Lahaanshaha iyo maamulka Xaarumaha Xannaanada Carruurta.**

1. Xarumaha Xannaanada carruurta waxaa yeelan kara Dowladda ama cid kale oo ay dowladdu u fasaxdo
2. Xannaanada carruurta waxaa ka mas'uul ah maamulkooda, dhismohooda iyo qalabeyntoodaba cidda leh, iyada oo ay Dowladdu siineyso daryeel iyo kormeer. Warqadda oggolaanshaha waxaa laga qaadanayaa Wasaaradda Waxbarashadda, Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

**Qodobka 12aad: Ujeeddooyinka Waxbarashada heerka kowaad**

Waxbarashada Heerka koowaad waa saldhigga Waxbarashada dalka. Waxbarashada heerkani waa in ay ardayga:

1. Ku barbaarisaa barashada iyo ku dhaqanka diinta Islaamka, anshaxa wanaagsan iyo waddaniyadda
2. ka caawisaa dhismaha jirka, maskaxda iyo shakhsiyadda
3. U suurta galisa ardayga aasaas aqooneed iyo mid xirfadeed oo uu waxbarashada heerka 2aad ku sii wadan karo

**Qodobka 13aad: Muddada Waxbarashada Heerka koowaad**

Waxbarashada Heerka koowaad oo ay muddadeedu tahay 8 sano (1aad-8aad), waa waajib, waana xaq ay u siman yihiin ardayda gaartay da' dugsiyeedka, gabdho iyo wiilalba.

**Qodobka 14aad: LacagtaWaxbarashada**

1. Waxbarashada Hoose-Dhexe ee Dowladdu waa lacag la'aan
2. Waxbarashada Hoose-Dhexe ee Gaarka loo leeyahay waxay noqon kartaa mid lacag ah iyo mid deeq ah.

**Qodobka 15aad: Da'da Qoritaanka Dugsiyada Hoose-Dhexe**

1. Carruurtaa gaartay 6 sano waxaa waajib ah in dugsiga ugu dhow laga diiwaan galiyo si ay waxbarashada Hoose-Dhexe u bilaabaan.
2. Dugsiyada Hoose-Dhexe ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed (JFS) waxaa lagu qori kara carruur kasta oo gaaray da'da 6 jir.
3. Da'da kor ku xusan waxaa lagu xaqiijinayaa warqadda dhalashada, go'aan dhakhtareed ama go'aan gudi dugsi.

**Qodobka 16aad: Ujeeddooyinka Waxbarashada Heerka Labaad**

Waxbarashada heerkani waa in ay bixiso aqoon kala duwan oo ay soo saarto qof:

1. Aaminsan kuna dhaqma diinta Islaamka iyo dhaqanka suubban.
2. Leh anshax wanaagsan, waddaniyad iyo bisayl aqooneed una hoggaansama shuruucda dalka
3. Ka dhisan aasaaska sayniska, teknoolojiyada, leh aqoon xirfadeed oo awood u siineysa kor u qaadidda tayada noloshiisa iyo tan bulshadiisa, caalamkana la jaan-qaadi kara.
4. Leh fikir, garasho iyo cabbiraad madax bannaan
5. Leh aqoon uu ku sii wadan karo tacliin sare

**Qodobka 17aad: Noocayada iyo Muddada Waxbarashada Heerka Labaad**

Waxbarashada heerka labaad waxaa ay u qeybsan tahay:-

1. Dugsiyada sare ee caadiga oo muddada wax lagu bartaa ay tahay afar sano
2. Macaahidda diinta Islaamka oo muddada wax lagu bartaa ay noqon karto saddex illaa afar sano

3. Dugsiyada sare ee farsamada oo muddada wax lagu bartaa ay noqon karto saddex ila afar sano.
4. Dugsiyada sare ee xirfadaha(skills) oo muddada wax lagu bartaa ay noqon karto laba illaa saddex sano

**Qodobka 18aad: Qoritaanka iyo Dhigashada Waxbarashada heerka Labaad**

b) Waxbarashada heerka labaad waxaa loo oggol yahay inuu galo arday soo dhammaystay Waxbarashada heerka 1aad, haystana shahaado.

t) Waxaa kaloo gali kara dadka waaweyn ee ka gudba imtixaanka shahaadiga ah ee loogu gudbaayo heer labaad.

## CUTUBKA 3AAD : MANHAJKA WAXBARASHADA

**Qodobka 19aad: Manhaj Waxbarasho**

Heer kasta oo waxbarasho waa in uu lahaadaa qorshe iyo manhaj ka turjumaya ujeeddooyinka Waxbarashada ee JFS oo uu ansixiyey Golaha Wasiiradu.

**Qodobka 20aad: Qorshe Manhaj**

Qorshaha manhaj kasta waa in uu ka koobnaadaa:

1. Ujeeddooyinka guud ee Waxbarashada JFS iyo kuwa gaarka u ah maadda kasta iyo heer kasta oo Waxbarasho oo maaddo-maaddo iyo fasal-fasal u qorsheysan.
2. Muqarar muujinaya cutubyada maaddooyinka iyo mira-dhalkooda.
3. Hababka wax baridda iyo barashada
4. Qalabka Waxbarashada
5. Muddada Waxbarashada iyo jadwalka waxbarashada
6. Qaabka qiimeynta, hirgelinta manhajka iyo horumarka ardayga

**Qodobka 21aad: Maaddooyinka Waxbarashada**

1. Maaddooyinka lagu baranayo dugsiyada dalka heerarkooda kala duwan waxaa ay ku soo bixi doonaan xeer nidaamiye uu soo saaro Wasiirku
2. Waxaa waajib ah in lagu dhigo dugsiyada dalka oodhan maaddooyinka diinta Islaamka, Af Soomaaliga iyo Af Carabiga
3. Maadda kasta waa in ay yeelataa buug ama buugaag saldhig u ah muqararka iyo tilmaame bare

## Qodobka 22aad: Afafka Waxbarashada

1. Waxbarashada dugsiyada hoose-dhexe (1-8) waxay ku baxaysaa Af Soomaali.
2. Luqadda Ingriiska oo tayeysan waxaa lagu billaabayaa fasalka 3aad ayada oo maaddo ahaan loo qaadanaayo
3. Waxbarashada dugsiyada sare waxay ku baxeysaa luqadaha Somaliga, Ingriiska ama Carabiga.
4. Waxbarashada heerka 1aad ee dugsiyada dalka waxaa lagu bixin karaa luqado kale haddii:
5. Ay ogolaansho ka helaan wasiirka, lana raacaayo manhaj Wasaaraddu ansixisey.
6. Ay dhigaan maaddooyinka Af Soomaaliga, Carabiga iyo Tarbiyada Islaamka.
7. Luqada Carabiga oo tayo leh iyo barashada diinta Islamka, oo ku baxeysa afka Carabiga, waa ku waajib fasallada oo dhan; waxaana lagu billaabayaa Xannaanada;
8. Cilmiga bulshadu waa ku waajib fasallada oo dhan; Af Soomaali ayuuna ku baxayaa.

## Qodobka 23aad: Kaabayaasha Manhajka

Muqarrarka rasmiga ah ee dugsiyada waxaa lagu xoojinaya kaabayaal qorsheysan oo loogu talagalay in ay dhisaan ardayga ruuxiisa, jirkiisa, maskaxdiisa, dhaqankiisa, anshixiisa iyo asluubtiisa, sida:

1. Tixgalinta xuquuda aadanaha, is ixtiraamida, baahida kala duwan ee wiilasha iyo gabdhaha, ladhaqanka bulshada, fahamka iyo masuuliyada guurka, iyo fursadaha kala duwan ee aasaaska u ah horumarka nolasha.

2. Kobcinta hiwaayadaha kala duwan ee wax ku oolka ah sida farshaxanka, hal abuurka, ciyaaraha, suugaanta, dhaqanka iyo hiddaha.

3. Xirfadaha wax soo saarka ee ku jaan go'an da'da ardayga iyo aqoontiisa

# CUTUBKA 4AAD: MACALLINKA

## Qodobka 24aad: Shuruudaha Xulashada Macallimiinta dugsiyada Hoose-Dhexe iyo kuwa sare

Waxaa macallin noqon kara qof buuxiyay shuruudaha soo socda:

1. Waa inuu leeyahay/leedahay aqoon gaareysa ama u dhiganta heerka saddexaad ee tacliinta dalka.
2. Waana inuu soo qaatay/qaadatay tababar macallinimo, oo aan ka yarayn laba (2) sano, haystaana rukhsad macallinnimo oo ay Wasaaraddu aqoonsantahay.

3. Waa in uusaan/aysan lahayn balwad wax u dhimi karta caafimaadkiisa, shaqadiisa, go'aan qaadashadiisa ama sumcaddiisa bulshada dhexdeeda.
4. Waa inuu leeyahay/leedahay akhlaaq fiican iyo dulqaad, maskax ahaana u fayow yahay, oo uusan galin dambi ay maxkamad xukuntey

**Qodobka 25aad: Xilka Macallinka**

Xilka macallinku waa:

1. Waxbaridda iyo barbaarinta ardayda
2. Fulinta manhajka dugsiga
3. Qiimeynta Waxbarashada ardayga
4. Ka war-bixinta manhajka Waxbarashada
5. Ka qeybgalka nashaadka dugsiga iyo ilaalinta nabadgelyada ardayda inta ay dugsiga joogaan
6. In uu si siman ardayda u tixgaliyo wiilal iyo gabdhaba

**Qodob 26aad: Shaqaaleynta Macallinka**

Shaqa qoridda macallinka iyo xuquuqdiisa waxaa lagu maamulayaa xeernidaamiye aan khilaafeyn sharciga shaqaalaha rayidka ah ee Dowladda Soomaaliyeed oo wasiirku soo saaro.

## CUTUBKA 5AAD:MAAMULKA DUGSIYADA

**Qodobka 27 aad: Aasaas Dugsi**

Dugsi waa goob leh degaan ku habboon in lagu fuliyo waxbarasho nidaamsan oo leh tilmaamahan:

1. Dugsi waxaa lagu aasaasi karaa ugu yaraan 25 arday iyo meel ku haboon Waxbarasho
2. Faahfaahinta qodobka 27aad iyo habraaca hindisaha, dismaha dugsiga, maamulkiisa iyo qolalka waxbarashada waxaa lagu sharxi doonaa xeernidaamiye wasiirku soo saaro.

**Qodobka 28 aad: Xiritaan Dugsi**

Dugsi waxaa la xiri karaa haddii uu buuxin waayo shuruudaha ku xusan qodobka 27 iyo xeernidaamiyeyaasha la xiriira ee u deggan Wasaaradda.

**Qodobka 29aad: Dhisme Dugsi**

Qaabka hindisaha iyo dhismaha qolalka Waxbarashada waxaa xaddidaya nidaamka Dhismaha Dugsiyada iyo talooyinka ka soo baxa Wasaaradda, iyada oo la tixgelinayo duruufaha kala duwan ee deegaanada dalka.

**Qodobka 30aad: Maamul Dugsi**

1. Dugsi kasta waa inuu yeeshaa qaab maamul oo tilmaamaya hoggaaminta, mas'uuliyadaha iyo hubinta howlaha dugsiga.
2. Dugsi kasta oo buuxiya shuruudaha aasaasiga ah ee dugsiyada waa in uu yeeshaa maamule cayiman.
3. Faahfaahinta qaabka maamulka dugsi iyo waajibaadka maamulaha waxaa lagu soo saaraya xeer nidaamiye gaar ah.

**Qodobka 31aad: Shuruudaha Magacaabidda Maamule Dugsi**

Maamule dugsi waxaa loo magacaabi karaa qof:

1. Buuxiyay/buuxisay shuruudaha macallinimo ee ku xusan qodobka 24aad ee sharcigan
2. Ku shaqeeyey maamule ku xegeennimo ugu yaraan hal sano
3. Leh khibrad macallinimo oo aan ka yarayn shan sano.
4. Maskax ahaan fayow
5. Leh karti, hoggaamin, howlkarnimo iyo akhlaaq wanaagsan
6. Haysto/haysato ugu yaraan shahaado jaamacadeed.
7. Xilka maamule dugsi iyo ku xigeenkiisa waxaa lagu qeexi doonaa xeernidaamiye uu soo saaro wasiirku.

**Qodobka 32aad: Guddiga Waaliddiinta Dugsiga**

Dugsi kastaa waxaa uu yeelanayaa guddi waalid oo ka kooban rag iyo haween, kuwaas oo xubnohooda iyo xilalkooda lagu faahfaahin doono xeer nidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

**Qodobka 33aad: Cidda iska leh Mas’uuliyadda Dugsiyada**

1. Dugsiyada Waxbarashada Hoose-Dhexe ee gaarka loo leeyahay waxaa maamulkooda, dhismohooda iyo qalabeyntoodaba ka mas'uul ah cidda leh, iyada oo ay Dowladdu ku sameyneyso kormeer iyo qiimeyn joogto ah

2. Dugsiyada Waxbarashada Hoose-Dhexe ee Dowladda waxaa dhismohooda, qalabeyntooda iyo maamulkoodaba ka mas'uul ah Dowlad-goboleedyada

**Qodobka 34aad: Guddoon Waxbarasho**

Hoggaaminta howlaha Waxbarashada gobollada iyo degmooyinka waxaa ka mas'uul ah Wasaaradaha Waxbarashada ee dawlad goboleedyada iyaga oo raacaya sharcigan iyo xeer nidaamiyeyaasha la xiriira.

**Qodobka 35aad: Anshaxa Goobta Waxbarashada**

1. Waxaa ka reebban macallimiinta iyo maamulka dugsiga in ay ardayga u geystaan falal wax u dhimi kara jirkiisa, naftiisa, maskaxdiisa ama shakhsiyaddiisa iyo sharaftiisa
2. Faahfaahinta qodobkani waxaa ay ku soo bixi doonaan xeer nidaamiye uu soo saaro Wasiirku

**CUTUBKA 6AAD: WAXBARASHADA DADBAN**

**Qodobka 36aad: Waxbarashada dadban**

Waxbarashada dadban waa waxbarasho nidaamsan oo loogu talo-galay dadka waaweyn ee ay da'doodu ka weyn tahay 18 (sideed & toban) jir.

**Qodobka 37aad: Ujeeddooyinka Waxbarashada dadban**

Waxbarashada dadban waa in:

1. Ardayga ka dhistaa fahamka xuquuda Aadanaha, anshaxa iyo dhaqanka suuban ee Islaamka.
2. Ay ardayga u suurta gelisaa kor u qaadidda awooddisa aqooneed, farsamo, xirfadeed iyo kordhinta awooddiisa wax soo saar dhaqaale
3. Ay siisaa ardayga awood uu ku sii wadan karo Waxbarashadiisa
4. Ay noqoto mid ku habboon dadka la siinayo waana in loo eegaa hadba sida loogu baahan yahay xagga horumarinta bulshada, dhaqaalaha iyo dhaqanka

**Qodobka 38aad: Noocyada Waxbarashada dadban**

Waxbarashada dadban waxay ka koobnaan kartaa qeybaha soo socda:

1. Barashada mabaad'ida diinta Islaamka iyo ku dhaqankeeda
2. Barashada akhriska, qorista iyo xisaabta
3. Waxbarasho guud oo ka sarreysa akhris-qorista oo heerar kala duwan leh
4. Barasho xirfado iyo farsamooyin kala duwan oo wax ku ool ah

### Qodobka 39aad: Mas'uuliyadda Waxbarashada dadban

1. Wasaaradu waa in ay dhiirri gelisaa faafinta Waxbarashada dadban; iyadoo la kaashaneysa wasaaradaha ay khuseyso, hey'adaha madaxa bannaan, iyo Dowlad goboleedyada
2. Wasaaraddu waxay dejineysaa siyaasada guud iyo barnaamijyada Waxbarashada dadban ee dalka.
3. Barashada xirfadaha kala duwan ee waxbarashada dadban waxaa fulin kara Wasaaradda, hey'adaha dowladda iyo kuwa sida gaarka ah loo leeyahey iyadoo la raacaayo siyaasadda Wasaaradda marwalba.

### Qodobka 40aad: Waxbarashada Haweenka

Waxbarashada haweenka waa Waxbarasho loogu tala galay in ay ahmiyad gaar ah siiso gabdhaha oo dhan si la mid ah tan wiilasha.

1. Wasaaraddu waa inay sameysaa istratejiyado iyo qorshooyin cad oo kor loogu qaadayo waxbarashada gabdhaha

2. Wasaaraddu waa inay sannad walba qoondo gaar ah siisaa tiro gabdho ah oo loo tababaro inay noqdaan macallimiin

## CUTUBKA 7AAD: DUGSIYADA GAARKA LOO LEEYAHEY

### Qodobka 41aad: Ujeedooyinka Dugsiyada gaarka loo leeyahay

Waxbarashada sida gaarka ah loo leeyehey waa wabarasho nidaamsan oo ay bixiyaan hay'ado ama dallado waxbarasho, oo si sharci ah uga diiwaan gashan Wasaardda. Noocyada, heerarka, manhajka iyo afafka Waxbarashada gaarka loo leeyahay waxay la mid yihiin kuwa dugsiyada dowladda ee ku xusan qodobbada 7, 8, 19 iyo 22.

Ujeedooyinka laga leeyahay Waxbarashada gaarka loo leeyahay waa:

1. In ay kordhiso fursadaha Waxbarasho ee dalka.
2. In ay kaalin ka qaadato kordhinta tayada Waxbarshada dalka.

3. In ay xoojiso tartanka waxbarista

**Qodobka 42aad: Shuruudaha lagu aqoonsanaayo dugsiyada gaarka loo leeyahay**

1. Dugsiyada gaarka ah waxaa yeelan kara mu'asasad Waxbarsho ama dallad Waxbarasho, oo si sharci ah u diiwaan gashan.
2. Mu'asasad Waxbarasho waxaa si sharci ah loo diiwaan gelin karaa marka ay fuliso shuruudaha wasaaraddu u dejisay Waxbarashada gaarka loo leeyahay.

3. Dugsiyada gaarka loo leeyahay waxaa la aqoonsan karaa:
   i. Kadib marka ay wasaaraddu ansixiso goobta iyo qaabka dhisme ee dugsiga, qalabkiisa, iyo maamulkiisa.
   ii. Haddii ay leedahay mu'asasad ama dallad Waxbarasho oo si sharci ah u diiwaan gashan.
   iii. Kadib marka la keeno qorshe waafaqsan manhajka dowlada JFS
   iv. Kadib marka la keeno caddayn in la hayo macallimiin isku dheelitiran kuna filan baahida dugsiga oo buuxiyay shuruudaha xulashada macallinka ee qodobka 24^aad ee sharcigan
   v. Caddayn awood hantiyeed oo suuro gelineysa fulinta howlaha waxbarashada dugsiga
   vi. Caddeyn/ hayn maamul buuxiya shuruudaha looga baahanyahay maamulkiisa iyo macallimiintiisa
   vii. Tifaftirka qodobkan waxaa uu ku soo bixi doonaa xeer nidaamiye uu soo saaro wasiirku

**Qodobka 43aad: Guddi Waalid**

Dugsi kasta oo lagu bixiyo waxbarasho gaar loo leeyahay waa in uuyeeshaa guddi waalid oo waaliddiintu iska soo dhex doorteen, kana kooban haween iyo rag.

**Qodobka 44aad: Kaalinta Wasaaradda**

Sharci siinta, qiimeynta, tayo dhowridda, dhaqan galinta manhajka, qaadidda imtixaanka shahaadiga ah iyo shahaado siinta dugsiyada gaarka loo leeyahay waxaa mas'uul ka ah wasaaradda.

**Qodobka 45aad: xiritaan dugsi gaar ah**

Wasaaraddu waxay awood u leedahay in ay mu'asasad Waxbarasho ka xirto dugsigii fulin waaya shuruudihii iyo awaamirta lagu aqoonsaday dugsigaas.

## CUTUBKA 8AAD: WAXBARASHADA BAAHIDA GAARKA AH

### Qodobka 46aad: Daboolista Baahida Gaarka ah

Ardayda baahiyaha gaarka ah leh waa in ay helaan Waxbarasho ku saleysan baahidooda iyo awooddooda, laguna dadaalo in la gaarsiiyo heer ay isku filnaadaan.

### Qodobka 47aad: Fulinta Waxbarashada Baahida Gaarka ah

Barnaamijyada lagu horumarinayo Waxbarashada baahida gaarka ah waxaa wadajir u fulinaya wasaaradda, hey'adaha qaranka iyo kuwa madaxa bannaan ee ku shaqada leh daryeelka bulshada (eeg ereybixinta).

### Qodobka 48aad: Shaqaalaha Waxbarashada Baahida Gaarka ah

Xarun kasta oo lagu fulinayo Waxbarashada baahida gaarka ah waa in ay leedahay macallimiin leh tababarka loo baahan yahay, qalab ku haboon in lagu fuliyo Waxbarashadaas iyo haddii loo baahdo shaqaale caafimaad.

### Qodobka 49aad: Kormeerka iyo Qiimeynta Waxbarashada Baahida Gaarka ah

Wasaaradda ayaa guud ahaan u xilsaaran xiriirinta, kormeerka iyo qiimeynta barnaamijyada Waxbarashada baahida gaarka ah.

## CUTUBKA 9AAD: QIIMEYNTA WAXBARASHADA

### Qodobka 50aad: Qiimeynta Waxbarashada

Wasaaradda ayaa ka mas'uul ah qiimeynta Waxbarashada dalka heerarkeeda koowaad (Hoose/Dhexe), labaad (dugsi sare) iyo Sedexaad (jaamacad) (Mid Dowladeed iyo mid gaar loo leeyahayba) iyo sharci-siinta macallimiinta dugsiga.

### Qodobka 51aad: Qiimaynta sannadlaha ah

Sannad dugsiyeed kasta waa in ardayda Waxbarashadooda la qiimeeyaa ugu yaraan labo jeer, la diiwaan geliyaa, la keydiyaa, lana ogeysiiyaa ardayda iyo waalidkoodba natiijada qiimaynta.

### Qodobka 52aad: Imtixaanka shahaadiga ah

Arday kasta oo dhameysta labada heer ee Waxbarasho (Hoose-Dhexe iyo Dugsiga sare), waa inuu u fariistaa imtixaanka shahaadiga ah ee Dowladda.

### Qodobka 53aad: Xafiiska Imtixaanaadka

Wasaaradda Waxbarashadu waa in ay lahaataa Xafiiska Imtixaanaadka Qaranka. Faahfaahinta qodobka waxay ku soo bixi doontaa xeer nidaamiye uu soo saaro wasiirku.

**Qodobka 54aad: Muddada iyo saacadaha sannad dugsiyeedka**

1. Mudada waxbarashada sannad dugsiyeedku waa 36 todobaad oo waxbarid ah.
2. Saacadaha waxbarashada sannad dugsiyeedka heerka 1aad kama yaraan karaan 1008 (kun iyo siddeed) saacadood oo Waxbarasho ah.
3. Saacadaha waxbarashada sannad dugsiyeedka heerka 2aad kama yaraan karaanr 1134 (kun, boqol iyo sodon iyo afar) saacadood oo Waxbarasho ah

## CUTUBKA 10AAD : DHULKA IYO DHISMAHA DUGSIYADA DOWLADDA

**Qodobka 55aad: Hantida ma-guurtada ah, Dhulka iyo Dhismaha**

1. Hantida ma-guurtada ah, dhulka bannaan iyo Dhismaha Dugsiyada dawladda waa hanti guud oo dadweyne waxaa ka mas'uul ah wasaaradda si gaar ahna looguma takri fali karo.
2. Hantida ma-guurtada ah, Dhulka iyo dhismaha dugsiyada lama iibin karo, lama bixin/hibeyn karo, lama wareejin karo, si gaar ahaaneedna looma isticmaali karo.
3. Qodobka 59aad ee sharcigan waxaa lagu faahfaahin doonaa xeer nidaamiye u gaar ah.

## CUTUBKA 11AAD: SHARCIGAN TAABBA-GALINTIISA IYO TIXRAACIISA

**Qodobka 56aad: Dawlad goboleedyada Federaalka ah**

Dawlad gobaleedyada Federalka ah ee Soomaaliya waxay sameysan karaan xeer-hoosaadyo waxbarasho oo iyaga u gaar ah kaas oo waafaqsan sharcigan.

**Qodobka 57aad: Dhaqan gelinta sharciga Waxbarashada Dalka**

Dhaqan gelinta sharciga Waxbarashada Dalka waxaa ka mas'uul ah Wasaaradda

**Qodobka 58aad: Nuqulka Soomaaligu waa marjic**

Nuqulka somaaliga ah ayaa asal u noqonaya sharcigan

**Qodobka 59aad: Gacan sarreyn**

Sharci kasta oo khuseeya arrimaha Waxbarashada, kana hor imaanaya sharcigaan waa wax kama jiraan.

**Qodobka 60aad: Burin**

Waxaa la burriyay xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

**Qodobka 61aad: Dhaqan-galin**

Sharcigani waxaa uu dhaqan galayaa marka la ansixiyo ee lagu soo saaro faafaahinta rasmiga ah ee dawladda.

## QEYBTA LABAAD

## SHARCIGA TACLIINTA SARE

## (HEERKA 3AAD)

## CUTUBKA 1AAD: QODOBADA GUUD

### QODOBKA 1AAD: FASIRAADA ERAYADA

Erayada hoos ku qoran, waxaa sharcigan dhexdiisa loola jeedaa fasiraada mid walba ku hor qoran:

1. **Hay'ad Tacliin Sare:** Waxaa loola jeedaa hay'ad waxbarsho oo bixisa waxbarasho heerka saddexaad oo ah waxbaris ama cilmi baaris ka saraysa waxbarashada dugsiga sare.
2. **Guddiga tacliinta sare**: Waxaa loola jeedaa Guddiga Tacliinta Sare ee Qaranka oo masuul ka ah habsami- u socodka iyo katalo bixinta Tacliinta Sare ee Dalka Soomaaliya.
3. **Jaamacad:** Waxaa loola jeedaa hay'ad waxbarsho oo bixisa Tacliinta heerka 3aad oo ka sareysa tan dugsiga sare, bixisana ugu yaraan shahaadada derejada kowaad 1aad.
4. **Mac'had**: Waxaa loola jeedaa hay'ad tacliin sare oo bixisa diploma ama shahaado ka hoosaysa darajada kowaad ee jaamacadda.
5. **Guddoomiye:** waxaa loola jeedaa qofka ugu sareeya jaamacadda.
6. **Gudigga sare ee Jaamacadaha Dowladda:** Waxaa loola jeedaa guddi u dhisan sida ku tilmaaman qodobka 4aad ee sharcigan uuna ugu sareeyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
7. **Shahaado**: Waxaa loola jeedaa caddeyn marqaati-kac ah oo lagu bixiyo waxbarsho qorshaysan oo muddo xaddidan lagu qaatay.
8. **Ruqsad:** Waxaa loola jeedaa warqad oggolaansho ah oo si sharcigan waafaqsan loo siiyo hay'ad bixisa tacliinta sare oo soo cuuxisay shuruudihii iyo mustawihii looga baahnaa
9. **Xeerarka Jaamacadda:** Waxaa loola jeedaa sharci hoosaadka ay jaamacad leedahay, kaasoo khuseeya waxbarashada iyo maamulka
10. **Shahaadada darajada kowaad:** Waxaa loola jeedaa caddeyn la siiyo marka uu qofku dhamaysto wabarasho jaamacadeed darajadeeda 1aad.
11. **Waax:** Waxaa loola jeeda qayb ka tirsan kulliyadda oo howl mucayan ah qabaneysa
12. **Aqoon dersi:** waxaa loola jeedaa waxbarasho aan fool-ka-fool ahayn
13. **Hormuud:** Waa madaxa kulliyadda oo si waafaqsan xeerka Jaamacadda loogu magcaabay jagadaas.
14. **Guddiga Jaamacadda:** Waxaa loola jeedaa Guddiga jaamacaddu leedahay oo loogu talagalay in ay ka shaqeeyaan maamulida iyo howlgelinta jaamacadda.
15. **Guddiga Sare ee Jaamacadda/Mac'hadka:** Waxaa loola jeedaa Guddiga ugu sareeya ee maamula jaamacadda/machadka.
16. **Macallin Jaamacadeed:** Waxaa loola jeeda bare sare ee wax ka dhiga hay'ad tacliin sare si joogto ah ama si aanjoogto ahayn.
17. **"Takhasuska Sare:** Waa aqoon waxbarasho oo ka sareysa darajada 1aad ee waxbarashada tacliinta sare.

## QODOBKA 2AAD: UJEEDADA SHARCIGA

Ujeeddooyinka Sharcigaani waa sida soo socta:

1. Horumarinta nidaamka lagu maamulayo hay'adaha tacliinta sare,
2. Midaynta shahaadooyinka ama xirfadaha isku midka ah iyo sidoo kale, mideynta shuruudaha lagu qiiymaynaayo maaddooyinka isku midka ah ama isku-dhow ee ay bixiyaan hay'adaha kala duwan ee tacliinta sare.
3. Xurmaynaynta madax bannaanida iyo xorriyadda hay'adaha si loo fududeeyo, loo tayeeyo, loona baahiyo tacliinta sare.
4. Nidaaminta, hagidda, aasaasidda iyo maamulidda hay'adaha bixiyaa tacliinta sare..
5. Dhiirigelinta, sare u qaadida, cilmi barista, hal abuurka iyo farshaxanka si waafaqsan qoodobka 30aad faqradiisa 5aad ee dastuurka ku meelgaarka ah.
6. Horumarinta, baahinta iyo fidinta waxbarashada sare ee Jamhuuriyadda.
7. Habayenta iyo dejinta siyaasdda tacliinta sare ee Jamhuuriyadda

## QODOBKA 3AAD: MABAADII'DA GUUD

Si loo habeeyo nidaamka, iyo qaab-dhismeedka waxbarashada tacliinta sare, waa in la dhowro mabaadi'da soo socota:

1. Dhaqan-gelinta siyaasad waxbarasho oo ku saleysan sharcigan oo hay'adaha Tacliinta Sare u siman yihiin.
2. Dejinta hal-beeg waxbarasho iyo dhaqan gelinta qaab lagu xaqiijinayo tayada Jaamacadaha iyo Tacliinta Sare qaybeheeda kala duwan;
3. Dhisidda iskaashi qaabeysan oo lala yeesho ururrada bulshada, ganacsatada, hay'adaha tacliinta sare ee adduunka, kuwa cilmi baarista iyo kuwa dowladda ee gacan saarka la leh Tacliinta Sare.
4. Taabbo-galinta xaqa muwaadin kasta u leeyahay in uu sii wato waxbarasho tacliin sare oo tayo leh, hadii uu awoodo.

## <u>CUTUBKA 2AAD: DHISMAHA GUDIGA TACLIINTA SARE</u>

## QODOBKA 4AAD: SHAKHSIYADA QAANUUNIGA AH EE GUDDIGA

1. Guddigu wuxuu leeyahay shakhsiyad qaanuuneed oo uu ku saxiixi karo heshiisyo, si uu u fuliyo arimaha lagama maarmaanka u ah habsami u socodka howlaha tacliinta sare ee dalka si waafaqsan sharcigan.
2. Gudigu wuxuu awood u leeyahay in magaciisa:
    a. Lagu dacweyn karo asna uu wax ku dacweyn karo.
    b. Lagu deymin karo

   c. Hanti ku kasban karo.
3. Inuu shaabad samaysan karo.

**QODOBKA 5AAD: QAAB-DHISMEEDKA GUDDIGGA**

Guddiga tacliinta sare ee qaranku wuxuu ka kooban yahay sagaal (9) xubnood oo laga soo xulayo bahwadaagta waxbarashada. Shuruudaha, habraaca, waajibaadka iyo awoodaha; sidoo kale, dhismaha guddi hoosaadyada, guddoonka guddiga iyo meelaha xubnaha guddigu ay ka imaanayaan waxay ku soo bixi doonaan xeer nidaamiye uu soo saaro wasiirku.

## CUTUBKA 3AAD: HAY'ADAHA TACLIINTA SARE

**QODOBKA 6AAD: QAYBAHA AY KA KOOBAN YIHIIN HAY'ADAHA TACLIINTA SARE**

Noocyada hay'adaha tacliinta sare waa sida soo socota:
1. Jaamacad ama Mac'had dowladeed.
2. Jaamacad ama Mac'had gaar loo leeyahay.
3. Xarun cilimi baaris (Akaadeemiyad) dowladeed
4. Xarun cilmi baaris (Akaadeemiyad) gaar loo leeyahay.

**QODOBKA 7AAD WAAJIBAADKA HAY'ADAHA TACLIINTA SARE**

Sharcigan wuxuu hay'adaha tacliinta sare awood u siinayaa:
1. Bixinta shahaado sare oo khuseysa darajooyinka kala duwan ee tacliinta sare marka la hubiyo in ardaygu buuxiyey shuruudihii looga baahnaa.
2. Kala noqoshada shahaado kasta oo la bixiyey haddii ay xaqiiqowdo in shahaadadaas lagu kasbaday si aan sharciga waafaqsaneyn.
3. Gudbinta aqoonta tacliinta sare, horumarinta cilmi-baarista iyo sare u qaadida tayada waxbarashada.
4. Faafinta aqoonta iyo fursad siinta dadka doonaya in ay tacliinta sare helaan, iyada oo tixgelin gaara la siinayo haweeenka iyo dadka baahida gaarka ah qaba.
5. Waxay magacaabi karaan guddi hawleedyo u gaar ah iyagoo raacaya xeerarkooda.
6. Waxay abaabuli karaan kulamo iyo dood-cilmiyeedyo madax bannaan kuwaas oo dhowraya shuruucda dalka, qiyamka Islaamka, anshaxa iyo dhaqanka suuban ee ummadda Soomaaliyeed
7. Waxay xiriir wax wada qabsi iyo iskaashi oo aan ka hor imaaneynin shuruucda waxbarashada dalka la samaysan karaan:
   I. Jaamacado ama macaahid kale
   II. Hay'ado waxbarasho iyo ururo waxbarashada ka shaqeeya

III. Xarumo cilmi baariseed

## CUTUBKA 4AAD: DHISMAHA JAAMACADAHA

### QODOBKA 8AAD: HABRAACA LAGU DHISAYO JAAMACADAHA DOWLADDA

Si loo dhiso jaamacad dowladeed, waxa waajib ah in laraaco habraacaan:

1. Dhisitaanka jaamacad ay dowladdu leedahey waa in lagu saleeyaa daraasad cilmiyeysan iyo baahi xaqiiqa ah.
2. Habraaca lagu dhisayo jaamacad dowladeed wuxuu ku soo bixi doonaa xeer nidaamiye u gaar ah oo wasiirku soo saaro.

### QODOBKA 9AAD HABRAACA LAGU DHISAYO JAAMACADAHA GAARKA LOO LEEYAHAY

1. Dalka waxaa laga furi karaa jaamacado gaar loo leeyahay si waafaqsan qodobka 30aad faaqradiisa 4aad ee Dastuurka.
2. Jaamacadaha gaarka loo leeyahay waxay leeyihiin madaxbanaani iyo jiritaanka sharci-qaanuuneed.
3. Dhisitaanka jaamacadaha gaarka loo leeyahey waan in lagu saleeyaa daraasad cilmiyeysan iyo baahi xaqiiqa ah.
4. Habraaca lagu dhisayo/unkaayo jaamacadaha gaarka loo leeyahey wuxuu ku soo bixi doonaa xeer nidaamiye u gaar ah oo wasiirku soo saaro

### QODOBKA 10AAD: SHURUUDAHA DIIWAANGELINTA

Wasaaradu waxay diiwaangelin kartaa jaamacadaha gaarka loo lee yahay marka uu codsaduhu buuxiyo shuruudahaan soo socda:

1. Barnaamij waxbarasho oo waafaqsan ujeedooyinka iyo istraatiijiyada guud ee tacliinta sare ee dalka.
2. Goob waxbarasho ku haboon buuxisayna shuruudaha qiimeynta Jaamacadaha dalka.
3. Ugu yaraan afar kulliyadood oo leh afar takhasus
4. Dhaqaale kufilan jaamacadda mudo hal sano ah.
5. Soo gudbinta liiska barayaal sare oo leh takhasusaad sare oo la xiriira barnaamij keeda.

### QODOBKA 11AAD: RUQSAD SIIN KU MEEL GAAR AH

1. Jaamacad waxaa ruqsad ku meelgaar ah la siin karaa marka ay soo dhamaystirto shuruudihii diiwaangelinta sida ku cad qodobka 10aad ee sharcigan.

2. Ruqsadda ku meelgaarka ah waa ay bureysaa hadii jaamacaddu ay soo dhammeystiri weyso waxyaabihii laga rabay ama la ogaaday in ay soo gudbisey xog khaldan. Burrintuna waa in ay ahaataa mid qoraal ah oo sababaysan.

**QODOBKA 12AAD: DIIWAANGELIN DHAMAYSTIRAN**

Jaamacaddu markay si buuxda u gudato waajibaadka uu farayo sharcigani kana soo gudubto qiimaynta tayada tacliinta sare mudo 3 sano gudohood ah waxaa la siinayaa ruqsad dhamaystiran.

**CUTUBKA 5AAD: MAAMULKA HAY'ADAHA TACLIINTA SARE**

**QODOBKA 13AAD: QAABD-HISMEEDKA HAY'ADAHA TACLIINTA SARE**

1. Waa in hay'ad kasta oo tacliin sare ay leedahay qaab dhismeedyada soo socda:
   b) Guddi sare oo Jaamacadeed (Board of trustee)

   t) Guddiga Kulliyadaha

2. Habraaca Xubnaha guddiga sare ee jaamacadda, shuruudahooda, waajibaadka iyo awoodaha; sidoo kale, guddoonkoodu waxay ku soo bixi doonaan xeer nidaamiye uu soo saaro wasiirku.

**CUTUBKA 6AAD: TAYO- DHOWRKA HAY'ADAHA TACLIINTA SARE**

**QODOBKA 14AAD: KAALINTA DOWLADDA EE XAQIIJINTA TAYADA**

1. Wasaaradda ayaa ka masuul ah qaabka lagu xaqiijinayo tayada iyo jaangoynta halbeegyada tacliinta sare.
2. Habraaca tao dhowrka wuxuu ku soo bixi doonaa xeer nidaamiye uu soo saaro wasiirku

**QODOBKA 15 AAD: KAALINTA JAAMACADAHA GAARKA LOO LEEYAHAY EE ILAALINTA TAYADA**

3. Hay'ad kasta oo bixisa Tacliin sare waa inay leedahay shuruudo iyo hannaan lagu xaqiijinayo tayada, waana inay ku qeexan tahay xeer-hoosaadyo, siyaasado ama habraacyo u gaar ah hay'adda, kuwaas oo waafaqsan sharciga tacliinta sare iyo xeernidaamiyeyaasha la xiriira.
4. Hay'ad kasta oo bixsa Tacliin Sare waxaa inay si gaar ah u buuxisaa shuruudahan:

- In ay leedahay muqarrar (syllabus) cayiman oo sannadla ah
- In ay isku dheellitiranyihiin saacadaha uu ardaygu casharka qaadanayo iyo saacadaha u dagsan in maadada lagu dhameeyo
- Maaddo kasta ay isku dheelltiran tahay marka laga eego casharka, cilmi- baarista iyo tijaabinta.
- In uu cadyahay qaabkii loo horumarin lahaa macallimiinta jaamacadda.
- Inuu jiro urur ardada matala.
- Darajada macallimiinu aanay ka hooseyninn Master Degree ama PHD
- Faahfaahinta qodobkani waxay ku soo bixi doontaa xeernidaamiye uu soo saaro wasiirku

**QODOBKA 16AAD: AQBALAADDA ARDAYDA GALEYSA TACLINTA SARE**

1. Muwaadin kasta oo Soomaaliyeed oo doonaya inuu u gudbo waxbarashada heerka saddexaad buuxiyayna Shuruudaha loo baahan yahay, haystana shahaaddo dugsi sare oo la aqoonsan yahay wuxuu xaq u leeyahay in loo oggolaado Jaamacadaha dalka.
2. Ardayda jaamacaddaha dowladda galaysa oo hibooyinka gaarka leh sida ciyaaraha, muusikada, iyo hiwaayadaha kale ee wax ku oolka ah waa in tixgalin loo sameeya si loo dhiira galiyo
3. Aqbalaadda jaamacadaha dowladda waxaa lagu saleyneyaa baahida waxbarasho ee jirta iyo shaqalaha loo bahan yahay.

**QODOBKA 17AAD: TAYADA AQOONEED EE MADAXDA HAY'ADAHA TACLIINTA SARE**

1. Madaxda Hay'adaha bixiya Tacliinta Sare waxaa lagu xirayaa sifooyin iyo tayo aqooneed oo gaar ah. Sifooyinka iyo heerka aqooneed ee laga doonayo waxay ku soo bixi doontaa xeer nidaamiye uu soo saaro wasiirku

**QODOBKA 18AAD: ADEEGYADA LAGA DOONAYO HAY'ADAHA TACLIINTA SARE**

Hay'ad waliba oo bixisa Tacliin Sare waxaa looga baahan yahay shuruudahan:

1. Fasallo waafaqsan nidaamka u degsan dhismaha Waxbarshada Tacliinta Sare.
2. Maktabad dhexe oo si casri ah u qalabeysan lagana heli karo adeegyada ay ardaydu uga baahan yihiin duruustooda iyo cilmi baarista.
3. Kulliyadaha cilmiga ah waa inay leeyihiin shaybaaro casri ah oo la socda teknolojiyada cusub oo ardayda loogu sameeyo tusmooyinka, tababarrada, tijaabooyinka iyo cilmi baarista.
4. Jaamacad/mac'had waliba waa in uu lahaadaa xarun IT oo casri ah oo ardayda u fududeysa waxbarashada iyo cilmi barista.
5. Masaajid, garoommada ciyaaraha iyo maqaayad.

## CUTUBKA 7AAD: DEEQAHA WAXBARASHO

### QODOBKA 19AAD: MAAMULIDDA DEEQAHA WAXBARSHO

1- Wasaaradda ayaa mas'uul ka ah nidaaminta iyo maamulidda deeqaha waxbarsho

### QODOBKA 20AAD: SHURUUDAHA BIXINTA DEEQAHA WAXBARSHO

Arday kasta oo doonayo inuu helo deeq waxbarsho waa inuu:

1. Ka soo baxey dugsigga sare kuna gudbey natiijo sare.
2. Asluubtiisu ay wanaagsan tahay oo aan hore dembi ciqaabeed loogu xukumin, caafimaadkiisuna fiican yahay.
3. Ka helaa wasaaradda qiimeynta shahaadadiisa iyo Tasdiiqeedaba haddii uu ardaygu ka soo baxey dugsi sare ee waddanka debaddiisa ah.
4. Ku guuleysto imtixaanka ogalaanshaha deeqda waxbarashada.

### QODOBKA 21AAD: WAAJIBAADKA SHAQAALAHA DEEQ WAXBARSHO LA SIIYEY

1. Ardayga/shaqaalaha deeqda waxbarasho loo direy waa inuu waxbarashada ku soo dhammeeyaa muddada loo qabtay Waxaa laga joojinayaa deeqda waxbarasho ee la siiyey haddii ay ku caddaato xaaladaha soo socda:
   a) Inuu dembi ka galey waddanka uu wax ka baranaayo.
   b) Inuu dib uga dhaco xilligii ay wasaaraddu u qabatey inuu ku soo dhameystiro deeqda waxbarasho sabab la'aan.
   c) Inuu ku dhaco imtixaanaadka labo sano oo isku xigta ama uu dhaafo.
   **d)** Qofka shaqaalaha ah waxaa laga joojinayaa fasax lacageedka waxbarashada haddii si ula kac ah usameeyo arrimaha kor kuxusan.

### QODOBKA 22AAD: BAAHINTA DEEQDA WAXBARSHO

1. Wasaaradda waxaa ku waajib ah inay ogeysiiso dadweynaha, cadadka deeq waxbarsho ah ee laga helay dibadda, dalalka bixiyay, iyo mudada ay soconnayso deeqdaas.

## CUTUBKA 8AAD: MAC'HADYADA FARSAMADA SARE

### QODOBKA 23AAD: MAC'HADYADA FARSAMADA SARE

1. Mac'hadyada farsamada sare waxaa gali kara ardayda soo dhamaysatay dugsiyada sare, waxaa lagu dhisayaa si waafaqsan sharcigan, waxaana lagu maamulayaa xeernidaamiye u gaar ah oo uu soo saaro wasiirku

### QODOBKA 24AAD: MAC'HADKA TABABBARKA XIRFADAHA

Mac'hadka tababarka xirfadaha waxaa lagu dhisayaa si wafaqsan sharciga waxaana lagu maamulayaa xeernidaamiye u gaar ah oo uu soo saaro wasiirku

## CUTUBKA 9AAD: QODOBADA QUBANAHA

### QODOBKA 25AAD: HAGIDDA SIYAASADDA EE WASIIRKA

Wasiirka Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare wuxuu awood u leeyahay in uu:

a) Qaato go'aan ka dhan hay'adaha waxbarashada tacliinta sare, kuwa gaarka loo leeyahay iyo kuwa dowliga ah haddii loo baahdo oo ay xaalad degdeg ah timaado
b) Soo saaro wareegto ku socoto dhammaan hay'adaha waxbarashada tacliinta sare, kuwa gaarka loo leeyahay iyo kuwa dowliga ah si loo fuliyo siyaasadda tacliinta sare
c) Go'aan kagaaro arrimaha degdega ah ee ay Guddiga Qaranka Tacliinta Sare ka tala bixin waayaan

### QODOBKA 26AAD: HAY'ADDAHA KHILAAFA SHARCIGAN

1. Lagama furi karo dalka jaamacad ama mac'had sare iyadoo aan wasaaradda laga heysan oggolaansho rasmi ah oo waafaqsan sharcigan.
2. Ku xad gudubka qodobkaan faqradiisa 1aad, waa dambi waxaana lagu mutaysanayaa ganaax lacag ah iyo ciqaab kale.

### QODOBKA 27AAD: TAYADA IYO AQOONTA BARAYAASHA JAAMACADDAHA

Lama shaqaalayn karo bare/macallin Jamacadeed oo aan lahayn tayada bare/macallinnimo ee u degsan Guddiga Tacliinta Sare ee Qaranka.

### QODOBKA 28AAD: BURINTA

Waxaa la burriyey sharci kasta oo aan la soconkarin sharciga iyo xeer nidaamiye kasta oon aan waafaqsanayn sharcigan.

### QODOBKA 29AAD: DHAQANGALKA SHARCIGA

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa marka uu baarlamaanku ansixiyo uuna saxiixo madexwenayna, JFS laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.